**Waalidiinta/mas’uuliyiinta ay carruurtoodu aaddo xannaanooyinka carruurta/SFO ee degmada.**

Dawladdu waxay go’aamisay in waalidiintu aanay wax kharash ah ka bixinayn xannaanada carruurta iyo SFO-ga muddada ay adeegyadu xiranyihiin. Kharash ka dhaafistaasi waxay khusaysaa dhammaan carruurta aadda xannaanada carruurta iyo SFO-ga, xataa way ku jiraan kuwa deeqda u haysta muddadaas ay adeegyadu xiranyihiin. **Iyadoo lagu salaynayo qaraarkii ay dawladdu ku gaartay in xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyadu ay weli sii xirnaanayaan, degmada Trondheim ma soo dirayso jiirooyin ay waalidiintu bishan abriil ka bixinayaan kharashka xannaanooyinka carruurta iyo SFO-ga.** Xannaanooyinka carruurta ee birifaatiga ahi iyagaa jiiroorinka soo dirta taas daraadeedna waxaa waalidiinta laga codsanayaa inay la xiriiraan isla xannaanada carruurtooda si ay u helaan macluumaad khuseeya jiirooyinka iyo kharash bixinta muddadaan la cayimay.